Warbixinta Waaladiinta / Daryeelayaasha C-Card

C-Card waa kaar siiyo dadka helitaan dhaqsi ah oo sahlan ee kondhomyo bilaash ah. Gudaha Leicester, Leicestershire iyo Rutland, adeegaan waxaa loo heli karaa qof walba oo da'diisa ah 13+.

Ujeedka qorshaha waa siinta dadka da'dooda ah 13 iyo ka weyn, helitaan dhaqsi ah oo sahlan oo kondhomyo bilaash ah, ee lagu yareeyo tirada STIs iyo uurka aan la qorsheynin.

Waa adeeg kalsooni ah oo sidoo kale siiyo helitaan warbixinta iyo tallada ku saabsan caafimaadka galmada iyo xiriirada; sidoo kale sida fursada dadka dhalinyarada ah si ay u siidaayaan walaacyo walba ee ay qabaan iyo helitaanka taageero haddii ay la kulmayaan halista ama xaaladaha ka faa'ideysiga.

Dhalinyarada waxay isticmaali karaan C-Card kooda si ay u helaan kondhomyo bilaash ah ee meelo kala duwan, oo ay ku jiraan dugsiyada, kulliyadaha, farmashiyada iyo rugaha caafimaadka galmada. Tani waxay u ogolaataa iyaga inay booqdaan dhinaca ay dareemeen inay aad ugu raaxo qabaan, oo kordhiyo suurtogalnimadooda lagu helayo kondhomyo markii ay u baahanyihiin.

Waan fahamsannahay in waaladiinta qaar iyo daryeelayaasha ay su'aalo qabi karaan ee ku saabsan C-Card qorshaha, hoos waa jawaabaha kooxdeena qaar ka mid ah kuwa ugu caansan ee la weydiiyo:

Ma sharci baa in la siiyo kondhomyo waaladiinta/daryeelayaasha ka hooseeyo 16jirka iyada oo aan jirin ogolaanshaha

Haa, qaabka kondhomyada C-Card loo siiyo kuwa ka hooseeyo 16' jirka waa sharci. Markii qof dhalinyaro ah laga diiwaangeliyo C-Card, wada sheekeysiga diiwaangelinta waxaa sameynayo qof u tababaran qiimeynta fahamka dhalinyaraha iyo kartida; waxay ku sameynayaan midaan iyada oo la isticmaalayo jaheynada Fraser.

Si loogu arko "kartida Fraser" qofka dhalinyara ah waa inuu awoodaa fahamka warbixinta iyo halis walba, iyo kadib u isticmaalaa cilmigaan si dooq loogu sameeyo. Jaheynada Fraser waxaa loogu hormariyay si gaar ah agagaarka qodobka caafimaadka galmada iyo adeegyada ka hortaga uurka ee kuwa ka hooseeyo 16'jirka, iyo sidaas waxay ku daboolaan dhammaan qeybaha sharciga oo si buuxdo ah.

Haddii qofka ee diiwaangelinayo qof dhalinyara ah ee ka walaacsan caafimaadkooda ama badqabka, gudbin ayaa la sameynayaa si loo hubiyo in qofka dhalinyaraha ah helaa taageero walboo loo baahdo. Qaar ka mid ah nidaamkaan gudbinta waxaa ku jiri karo xirfadle kuula soo xiriirayo si kuu ogeysiiyo tallaabooyinka la qaaday si loogu hayo qofka dhalinyaraha ah badqab, oo kaa qeybgeliyo nidaamka.

Maxaad u siisay kondhomyo dhalinyarada ka hooseeyo da'da ogolaanshaha?

Inkastoo da'da sharciga ogolaanshaha Ingiriiska ay tahay 16, waan ognahay in qaar ka mid ah dadka dhalinyarta ah ay galmo sameynayaan ama tixgelinayaan galmada waqtiga ugu horeeyo oo da' yar ah. Qofka dhameystirayo diiwaangelinta wuxuu marwalba ka hadlayaa da'da ogolaanshaha iyo waxa midaan la micna tahay. Sida dheer ee qofka dhalinyarada ah loo arko kartida Fraser (iyada oo la isticmaalayo qaab dhismeedka kore), waxay helayaan helitaanka C-Card oo ka caawiyo iyaga inay ku hayaan nafsadooda si badqab ah oo caafimaadan ee suurtogal ah.

Miyaad ku dhiirogelineysaa dadka dhalinyaraha ah inay galmo sameeyaan?

Maya, siinta dadka dhalinyarada ah fursada ay ku helaan kondhomyo oo ku helaan wadasheekeysiga diiwaangelinta C-Card, waxay u suurtogeleysaa iyaga inay raadiyaan tayo sareyso, warbixinta caafimaadka galmada saxda ah iyo tallada; oo ku taageero iyaga sameynta go'aan la ogeysiiyay ee ku saabsan haddii ay dareemaan inay diyaar u yihiin inay galmo sameeyaan.

Haddii qofka dhalinyaraha ah uu kadib go'aansado inuu galmo sameeyo, waxay heli karaan kondhomyo lagu yareynayo halista uur aan loogu tallogelin iyo STIs, baro sida loogu isticmaalo kondhomyada si ku haboon, oo way ogyihiin meesha iyo sida loo raadiyo taageero haddii ay u baahdaan.

C-Card waxaa sidoo kale inta badan la gaarsiiyaa dhinaca kulanka waxbarashada, meeshaas oo dadka dhalinyarada ah wax ka bartaan oo helaan fursada looga hadlayo mowduucyada sida xiriiro caafimaadan iyo daahitaan, sidoo kale sida cawaaqiibaha imaan karo ee galmada (uurka iyo STIs).

Maxaan sameeyaa haddii aan ka helo C-Card gurigeyga?

Uma baahnid inaad sameysid wax walba haddii aad ka heshid C-Card guriga. Haddii aad raaxo ku dareentid si furan uga hadlida galmada iyo xiriirada, way wanaagsantahay in la hubiyo in carruurtaada, ama dadka dhalinyarada ah ee aad daryeeshid, inay garanayaan inay kula hadli karaan; laakin waa muhiim inay dareemaan raaxo sidoo kale.

Kaliya u sheeg iyaga haddii ay rabaan inay ka hadlaan wax walba oo aad marwalba dhageysaneysid iyaga oo aadan marnaba ku xukumeynin iyaga. Ku hay wadasheekeysigaaga raaxo adiga oo aan wadaageynin waaya aragnimadaada gaarka ah; iyo haddii abid lagu weydiiyo su'aal aadan garaneyn jawaabta ee, wada fiiriya adinka oo isticmaalayo websayd sumcad leh, sida keena oo kale!

Miyaa la iisheegayaa haddii dugsiga ay ka qeybgalaan uu ka qeyb yahay qorshaha C-Card?

Qaar ka mid ah dugsiyada waxay dooranayaan inay ogeysiiyaan waaladiinta haddii ay bilaabaan inay bixiyaan adeegyada C-Card, laakin qaarkood ma sameynayaan.

Adeegyada kale sida kooxyada kaalisada dugsiga waxay sidoo kale u bixin karaan C-Card sida ka qeyb ah bixintooda oo gudaha dugsiyada sidoo kale, marka C-Card waxaa lagu heli karaa inta badan meelaha waxbarashada ugu badan.